# Shaqadaada: Soo Baarida, Baaritaanada Caafimaadka iyo kuwa Maandooriyeyaasha iyo waxyaabo kale

Your Job: Background Checks, Medical and Drug Tests and More

## Maxay qolada shaqaddu i waydiisan kartaa?

Shaqadaadu waxa ay ku waydiisan kartaa waxyaabo badan oo akhbaar ah oo adiga kugu saabsan. Waxa ay ku waydiin karaa tixraacyo, diiwaanada kiridhidyada iyo kuwa dambiyada. Waxa ay ku waydiin karaan su’aalo si ay u eegaan inaad shaqada qaban karid iyo kale xataa waxa ay ku waydiisan karaan inaad imtixaano marto. **LAAKIIN** shaqadu kuma waydiin karaan su’aalo cid takoori kara. Aan ka ahayn inay jirto sabab sharci ah oo loo sameynayo taa, waxaa jira waxyaabo aysan qolada shaqadu kugu waydiin karin wareysiga ama codsiga shaqada.

Kuma waydiin karaan:

- da’daada
- xaalada guurkaaga *(kali, guur, furiin, kala bixid, ama laga dhintay)*
- sinjiyadaada
- cidda aad la galmoodo
- lab ama dhadig midka aad tahay
- sinjigaada
- midabkaada
- qowmiyadaada *(oo ay ku jirto timo-jarka caadiga ah)*
- caqiidadaada
- diintaada
- wadanka aad ka soo jeedo
- qaadashada gargaarada dowlada
- naafanimadaada
- uur
- xaaladaada qoys *(in aad caruur ama uur leedahay)*
- taariikh lacag bixin

Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Takoorida iyo Khashkhashaadaha Goobta Shaqada*.

## - SOO BAARIDA -



### Tixraacyada

Shaqooyinka waxa ay u baahan karaan wax la yiraa tixraacyo – dad aad horey ugu shaqaysay ama ku yaqaan.

### Diiwaanada Kiridhidyada


Shaqooyinku waxa ay ka soo heli karaan diiwaanadaada kiridhidyada hay’adaha kiridhiyada loo gudbiyo. Marka hore waa inay adiga kuu sheegaan inay taa sameynayaan AYNA ogolaanshahaaga oo qoran ay kaa helaan. Waa inay kuu sheegaan hadii wax waxbixinta kiridhidka ku qoran loo isticmaalay inay adiga

wax ku yeelaan kolka la qaadanayey go'aanka shaqo qorida. Waa inay ku siiyaan nuqul warbixinta ah iyo guudmar xaquuqdaada ah.

Waxa aad xaq u leedahay inaad saxdo ama aad ka mudacdo akhbaarta warbixinta. Eeg warbixintayada xogta aruursan ee *Warbixinta Sumcadda Deyn Bixinta*.

## Diiwaanada Dambiyada

Qolada shaqooyinku waxa ay soo baari karaan diiwaanada dambiyada. Uma baahna ogolaanshahaaga si ay u helaan diiwaanada degmada iyagu, laakiin waxa ay u baahan yihiin ogolaanshahaaga hadii ay isticmaalaan shirkad dadka u soo baarta. Sidoo kale iyana waa inaad ogolaansho siiso hadii ay rabaan inay eegaan diiwaanada FBI daama kuwa hay'ada BCA ee gobolka. Hadii aad ku tiraa maya, ma soo baari kartaan waxa ay kuu diidi karaan shaqada.



Sharcigu waxa u yiraa shirkadaha shaqada ee gaarka loo leeyahay, kuma waydiisan karaan adiga diiwaankaaga dambiyada ama kuma ay marin baaritaan taariikhdaada dambiyada ah ilaa iyo inta lagu waydiisanayo in lagu mariyo waraysi shaqada ah ama shaqo shuruudo lagu xiran siinteeda laguugu baaqo. Codsiyada hore ee shaqada ma lahaan karaan santuukh la calaamadiyo oo ku waydiiya inaad waligaa horey dambi u gashay iyo in kale.

Qolyaha shaqadu waa in ay u soo sameeyaan baaritaano dambiyada ah qaar ka mid ah shaqooyinka sida shaqaalaha daryeelada caafimaadka, shaqaalaha dugsiyada dowlada iyo maamuleyaasha guryaha saraha ah. Waa inay isticmaalaan uun dambi ku helida haddii ay jirto sababo hawleed. Qolada shaqadu kuguma khasbi karto inaad bixiso kharashka soo baarida dambiyada.

**Runta ka sheeg taariikhdaada dambiyada.** Aad bay u xun tahay inaad been ka sheegto dambiyada horey laguugu helay. Waxaa roon inaad marka horeba runta laga sheego lana sharxo wixii aad sameysay wixii kolkaa dambiga lagugu helay ka dambeeyey ee aan noloshaada ku hagaajisay. Hadii aadan runta ka sheegin taariikhdaada dambiyada shaqadana lagaa eryo, waxaa dhici karta inaadan helin lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo.

**Shaqada Dowlada:** Tan macnaheedu waa u shaqeynta dowladaha magaalada, gobolka, iyo degmada iyo hay'adaha. Sharciga Minnesota waxa uu leeyahay dambi ku helid kaama hor istaagi karo helida shaqooyinka dowlada ama helida shatiga gobolka aan ka ahayn in dambigu uu toos ula xiriiro shaqada. Xataa kolkaa, ma aha in shaqada laguu diido hadii aad cadeyn karto inaad shaqada qaban karto aadna is dhaqancelisay." Dhaqan-celinta macnaheedu waa inaad isbedeshay aysana u badnayn inaad dambi gaysato mar kale.

Shaqooyinka dowladdu ma adeegsan karaan akhbaar ku saabsan xirida, dambiyo ku helida la buriyey ama la tirtiray iyo dambiyada yaryar kolka aad codsato shaqo dowladeed ama shati sida shatiga timo-jarraha.

# - BAARIDA-



## Ka hor inta aan shaqada lagu qaadan

Shaqooyinku waxa ay adeegsan karaan jiribaado ah dhanka dabeecada ama madaxa si ay u baaraan codsadayaasha shaqada, laakiin kaliya uun ka dib **baaq** shaqo. Waxay kaloo adeegsan karaan aalada la yiraa been ogaadaha ama dheecaan baarid.

- **Baaritaanada Maandooriyeyaasha, Khamriga, iyo Mariwaanada**

Hadii qolo shaqo ay kaa rabto inaad marto baaritaan maandooriye ama khamri waa inaad ka heshaa ogaysiis qoraal ah. Kaliya waxa aad mari kartaa baarida ka dib kolka ay kuugu baaqaan shaqada. Cid walba oo loo sheego inay shaqada helayaan hadii ay ku baasaan baaridu waa khasab in la mariyo baaritaan isku mid ah.

Qolada shaqadu waa ay kaala noqon kartaa shaqada ay kuugu baaqday hadii aad diido inaad marto baaritaanka ama hadii aad ku dhacdo. Guud ahaan, lagaama **ceshin karo** shaqo lagu siiyey iyadoo sababtu tahay uun in jirkaaga helay mariwaanada.

Laakiin waa ay kaala noqon karaan shaqaddii ay kuugu baaqeen haddii aad codsanayso inaad ka shaqeyso shaqo amaanku uu xasaasi ku yahay. Taasi waa waxyaabaha sidda:

- askari bilays ah ama dab-damiye,
- la shaqeynta ilmo ama dad waaweyn oo dagan,
- daryeel caafimaad, oo si toos ah loola shaqeynayo bukaano, ama
- kolka ay tahay sharci gobol ama mid dowladda dhexe

Hadii ay kaala noqdaan shaqada ay kuugu baaqeen, waa inay kuu sheegaan sababta ayna ku siiyaan ogaysiis qoraal ah oo ku saabsan xaquuqdaada si uu kuugu sharxo ama aad ugu mudaco natiijooyinka. Haddii jirkaaga laga helo maandooriyeyaal ama khamri, waxaa aad codsan kartaa dib-u-baarid kale, laakiin shaqadaadda ayaa inta badan ku waydiisan inaad bixiso kharashka baaridaa. Khasab ma aha inaad bixiso kharashka baarida haddii aad sameysay baarid dareere afka (saamiyo candhuuf ah). Haddii aad doonayso dib-u-baarid, waa inaad ugu sheegto taa qoladda shaqada 48 saacadood gudahood haddii aad sameysay baarid dareere oo afka ah. Haddii uu ku baaray shaybaar aadna ku dhacday, waxaad siddoo kale aad u baahan tahay inaad qoraal ahaan ku codsato in dib-laguu-baaro. Waxa aad u baahan tahay inaad arritan ku sameyso 5 cisho oo maalmaha shaqada ah gudahood laga bilaabo kolka ay shaqada kuu sheegto inaad baaritaankii ku dhacday.

- **Baaritaanada Caafimaad**

Qolada shaqadu kaliya waxa ay kugu oran kartaa inaad marto baarid caafimaad ka dib kolka ay ku siiyaan shaqo ugu baaqid. Dhamaan codsadayaasha kale ee shaqada la midka ah taada waa khasab in la waydiisto inay maraan isla imtixaanka aad adigu marayso. Qolada shaqadu waa in ay bixiso kharashka baaritaanka caafimaad. Hadii uu imtixaanku muujiyo inaadan


qaban karin waajibaadka waaweyn ee shaqada, waa ay kaala noqon karaan shaqada ay kuugu baaqeen. Waa inay kuugu sheegaan sababta go'aankooda 10-cisho gudahood kolka ay gaaraan go'aankooda kama dambaysta ah.

- **Naafanimada iyo Cudurada Jirka**

Qolada shaqadu waa ay kaala noqon kartaa shaqo ay kuugu baaqeen hadii aadan awoodi doonin inaad gudato qaybaha waaweyn ee shaqada iyadoo sababtu tahay cudurka jirka ah ama mid miyirka ah. Hadii aad naafo tahay laakiin aad qaban karto shaqada hadii laguu fidiyo 'maciino macquul ah" qolada shaqadu kolkaa waa inay kuu fidiso maciinadaa. (Ka eeg hoose.) Laakiin qolo shaqo waa ay la noqon kartaa shaqo ay kuugu baaqday hadii naafanimadaadu ay khatar weyn gelinayso caafimaadka iyo amaanka goobta shaqada.

- **Maciinada Macquulka ah**

Hadii aad naafanimo aad leedahay, qolada shaqadu waa khasab inay kuu fidiyaan "maciino macquul' ah hadii loogu baahdo inay kaa caawiyaan inaad shaqada qabato. Maciinadu ma noqon karaan kuwa ku noqda "qaxar aan laga bixi karin" qolada shaqada. Taa macnaheedu waa qolada shaqadu waa inay ku sameyso isbedelo goobta shaqada ama xeerarka shaqada.



Tusaale ahaan, haddii aad u baahan tahay waqti siyaado ah oo aad ku isticmaasho musqusha ama aad u baahan tahay inaad bedesho jadwalka shaqadda booqashooyin dhaqtar awgood, arrimahaasi waxa ay soo hoos geli karaan waxa la yiraa maciinadda macquulka ah. Hadii aad gudan karto shaqada waajibaadkeeda muhiimka ah, shaqo laguugu baaqay lagaalama noqon karo naafanimada awgeed.

## Ka Dib Kolka aad Shaqada hesho


- **Baaritaanada Maandooriyeyaasha, Khamriga, iyo Mariwaanada**

Shaqooyinku waa ay kaa baari karaan maandooriyeyaasha sharci-darradda ah, khamri, iyo kanabas marka ay jiraan duruufo gaar ahi. Waa khasab inay shaqooyinku lahaadaan xeer qoraal ah oo ku saabsan baarida maandooriyaha, khamriga iy kanabaska. Waa lagaa baari karaa maandooriyeyaal iyo khamri iyagoo qayb ka ah baarid caafimaad oo sannadkii mar la sameeyo. Shaqooyinka intooda badan, qolada shaqadu waa inay ku siiso ogaysiis qoran oo 2 asbuuc ah oo kuu sheegaya in lagu baari doono.

Waxaa sidoo kale lagaa baari karaa kanabas haddii aad ka shaqeyso shaqo amaanku uu xasaasi ku yahay. Taasi waa waxyaabaha sidda:

- askari bilays ah ama dab-damiye,
- la shaqeynta ilmo ama dad waaweyn oo dagan,
- daryeel caafimaad, oo si toos ah loola shaqeynayo bukaano, ama
- kolka ay tahay sharci gobol ama mid dowladda dhexe

Xeerarka shaqooyinka amaankooda sida gaarka looga taxadarro sida, wadida baasaska ama tagaasida ama ku shaqeynta qalabka mashiinada cul-culus ahi waa ka duwan yihiin kuwa kale waxa ayna noqon karaan kuwa ka adag kuwa kale. Baaritaanada khamriga iyo maandooriyeyaasha iyo cannabis waxaa lagu sameyn karaa iyadoon la bixin digniin hore (bakhtiyaa-nasiib) shaqaalaha shaqooyinka amaankooda sida gaarka ah looga taxadarro.




Hadii aad isticmaasho laysinada darawalada gawaarida ganacsiga ee waaweyn si aad shaqadaada u qabato waxaa dhici karta in sharci dowlada dhexe leedahay uu ku quseyn karo adiga. Sharciyada dowlada dhexe waxa ay leeyihiin nidaamyo u gaar ah oo ku saabsan baarida maandooriyeyaasha iyo khamriga.

Wax kasta ha noqoto shaqada aad qabataaye, qolada shaqadu waxa ay kugu khasbi kartaa inaad marto baarid moondooriye ama cannabis ama khamri iyadoon lagu siin ogaysiis hore, hadii:

- Haddii ay haysataan sababa ay ugu maleeyaan in jirkaaga ay ku jiraan maan-dooriyeyaal, khamri, ama kanabas adigoo shaqeynaya.
- Aad jabiso xeerka qoran ee shaqada ee mamnuucaya gadida, haysashada ama isticmaalka maandooriyeyaal, khamri ama kanabas xilliga aad shaqadda ku jirto.
- Wax kugu gaaraan ama aad qof kale oo shaqaale ah aad wax ku gaarsiiso shaqada.
- Aad kalifto shil shaqada la xiriira oo dhaca ama aad ku shaqeyso qalab mashiin ah oo ku lug leh dhacdo shil ah oo shaqada ka dhacday.

Waxa aad leedahay xaq ah inaad ka hesho nuqul natiijada baarida. Waxaad kaloo leedahay xaq ah saamiga la baaray in dib loo baaro mar kale.

Hadii saamiga dib loo baaray marka labaad laga helo maandooriyeyaal ama cannabis ama khamri, waa ay ku ganaaxi karaan qolada shaqadu. Shaqada caadiyan kaaga eryi karaan marka ugu horeeysa ee lagaa helo maandooriyeyaal ama khamri inta aad u shaqeynayso wali iyaga aan ka ahayn inay kuugu baaqaan fursad ah in laguu diro dabiibid oo aad diido inaad aado ama aadan u soo wada dhamaysan dabiibida si najax ah. Laakiin qolada shaqadu waa ay kaa joojin KARTAA shaqada iyadoon lacagta shaqada ku socon inta la sugayo natiijooyinka baarida hadii qolada shaqadu ay aaminsan tahay in ay jirto sabab dhanka amaanka ah oo taa loo sameynayo.



Waxaa dhici karta inay khasab noqoto inaad bixiso kharashka baarid isticmaalka walax iyo wixii talo daryeel ah ee la soo jeediyo aan ka ahayn inuu bixiyo kuwaa qorshaha kaarka caafimaadka ee shaqaddu bixiso. Haddii aad sameyso baaritaan ama dabiibid ku saabsan khalad u isticmaalka walax, shaqaddu waa ay ku baari kartaa adiga 2 sanno ka dib kolkaa.

Hadii aad ku gudubto baarida ama dib-u-baarida, shaqadaadu waa inay shaqadaadii kugu soo celiso ayna ku siiso lacagta waqtigii shaqada lagaa fariisiyey aad shaqaysan lahayd.

- **Baritaanada caafimaad**
  Qoladaada shaqadu waxa ay ku marin karaan baaritaan caafimaad hadii ay jirto sabab shaqada la xiriirta oo loo sameynayo. Qoladaada shaqada waa in ay iyagu bixiyaan kharaskha baaritaanka.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**